# Qoraal bixinta macluumaad dadka Magangalyo doonka ah ee cudurka Hepatitis B

Waqti la baarayay caafimaadkaaga, ayaa wixii lagaa baarayay waxaa ka mid ahaa cudurka Hepatitis B. Halkaasna waxaa ka soo muuqday dhiig laga shakiyay, ee loo malayn karo in qaaday xanuunka Hepatitis B. Wixii laga helayna waxaa loo gudbin doonaa xarunta Caafimaadka ee qaabilsan iyo jawaabta baaritaankana waxaa loo gudbin doonaa maamulka qaabilsan dejinta iyo sidoo kalena waxaa loo gudbin doonaa Xaafiiska dawladda u qaabilsan Migrayshinka iyo Magangalyo doonka, sida uu sharcigu uu qabo (§ 62 ee sharciga Magangalyo doonka).

In wixii la helay la xaqiijiyo, waxaa loo baahan yahay baaritaan dheeraad ah, sida baaritaan raajo ee beerkaaga iyo baaritaan kale ee dhinaca dhiiga.
Sidaasoo kaliya ayaa lagu ogaan karaa in la daawayn karo iyo sida lagu daawayn karo. Fadlan raadso oo ugu tag sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah dhakhtarka xerada dadka la dajiyo. Sidoo kale waxaa kale oo aad u tagi kartaa Dhakhtar leh xaruntiisa oo aad adigu doonaysid. Warqaddii loo baahnaa in laguugu daaweeyo, waxa aad ka heli kartaa Maamulka Magaalada (Sozialamt) ama qaybta caawinaadda dawlada ee magaalada aad degan tahay.

<u>Xanuunka Hepatitis B.</u>
Xanuunka Hepatitis B waa xanuun la isku daaran karo oo ah Infekshan gala beerka. Siyaabo kala duwan ayuuna u socon karaa. Waxyaalaha suurtogalka ah ee lagu dareemo waxaa weeye, xanuun aan la tilmaami karin ee laga dareemo caloosha qaybteeda kore, u baahnaasho la´aan cunto oo abatit la´aan ah, Lalabo, Hunqaaco, Daal ama Cagaarshow (Indhaha oo jaale noqda, Jirka oo jaale noqda Xabka jirka). Waxaase kale oo dhici karta in aan wax xanuun ah aan la dareemin. Illaa 10% xanuunka Hepatitis B si buuxda uma raysto, waxaana uu isku bedalaa khatar ah in uu beerka xabag ku reebo. Taasina waxa ay si marba marba ka dambaysa sidii badinaysaa baab´inta Beerka. Taasina wax ay beerka u keeni kartaa yaraan beerka ah (Beerka oo yaraada oona adkaada), mararka qaarkoodna waxa gaari kartaa in uu Beerka Kraankaro (Beerka oo ay kaankaro ku dhaco) gaarsiiyo.

<u>Sida la isku qabadsiiyo.</u>
Isgaarsiinta xanuunka Hepatitis B waxaa lagu kala qaadaa qof qof amaba sida ugu badan dhiiga iyo galmada, sida yarse ee lagu kala qaado waxaa ka mid ah biyaha jirka ama dhididka.

*Galmada:* Waa mid aad u badan ee la isugu gudbiyo Hepatitis B. Galmada oo lagu kala qaado Hepatitis B waxaa sida ugu wayn lagu yarayn karaa isticmaalka Kamduumka la gashado.

*Xiriirka taabashada dhiiga qaba Viruska Hepatitis-B:* Tusaale ahaan taabashada dhaawac dhiig ka socdo, wada isticmaal cirbad (Sida isticmaalka Mukhaadaraadka), wada isticmaalka maqaska cidiyaha lagu jaro, sakiinta lagu xiirto, qalabka lagu xiirto ama cadaygaba.

*Ku daarashada cudurka ee dhalmada:* Hooyada qabta cudurka Hepatitis B waxa ay sida badan ugu daaratataa cunugeeda dhiiga ka yimaada marka ay dhalayso.

*Jir xardhinta, Akkuupuunktuwar, Dhago dalooshiga:* Haddii aan si wanaagsan aan loo nadaafadayna, sidoo kale waxaa lagu kala qaadi karaa Hepatitis B.

Suurogalinimada in la daweeyo:
Illaa inta daawaynta Hepatitis B loo baahan yahay, waxa ay ku xiran tahay jawaabta ka timaada baaritaanka dheeriga ah, waxaana kuu sharaxi doonaa Dhakhtaradaada ama Dhakhtarkaaga.

Sida nidaam u dhaqmida ah, si dadka kale looga badbaadiyo xanuunka.

- Xiriirka caadiga ee dhaqanka bulshada (Sida Salaanta, Wada hadalka) ma jirto khatar ah ku daaraso.
- U Sheeg dadka kale arrintan, in haddii ay imanayso taabasho dhiigaaga ama dhacaankaaga ka imanaya jirkaba (Tusaale ahaan, samaynta caawinaadda koowaad, gaar ahaan haddii ay dhaawac jireed ay dawaynayaan) ay qashadaan Galoofiska gacmaha.
- La socodsii qofka aad wadarta galmada aad wada leedihiin in ay dhici karo in aad qabto Hepatitis B.
- Galmada isticmaal Koonduumaha la gashado.
- Qoyskaaga iyo dadka kula deggan aqalkaba, waa in ay kuligood ay qaataan talaalka looga hor tago Hepatitis B.
- Ma samayn kartid dhiig ku deeqdo, haddii cudurka Hepatitis B aad qabto.
- Dumarka uurka leh ee qaba cudurka Hepatitis B, waxaa cunuga la talaali karaa si dhakhso ah marka uu dhasho, si ku daarashada cunuga looga difaaco.
- La socodsii dhakhtaradda ku daawaynaysa ama dhakhtarka ku daawaynaya ama dhakhtaradda Ilkaha ee ku daawaynaysa ama dhakhtarka Ilkaha ee ku daawaynaya cudurka aad qabto ee Hepatitis B ah.
- Haddii uu xanuunku uu kugu xumaado, la samee xariir waaxda Caafimaadka dawlada ee meesha aad degan tahay, lana socodsii xanuunkaaga Hepatitis B.

Waaxda Caafimaadka ee degaankaagana, si wanaagsan ayay kugula talin doonaan.

Warbixinta muhiimka ah iyo qoraaladaba, waxa aad kala degi kartaa Internetka:

- Waaxda Qaabilsan Caafimaadka iyo Badbaadinta cuntada ee Baayarn [Bayerisches Landesamt für Gesundheit und Lebensmittelsicherheit] ama (LGL) eeg www.lgl.bayern.de, ama raadi http://www.lgl.bayern.de/gesundheit/infektionsschutz/asylbewerber_gesundheit/index.htm (Luqadda Jarmalka kaliya ayaa lagu heli karaa).

- Robert Koch-Institut eegna www.rki.de ama garaac http://www.rki.de/asylsuchende (Luqadda Jarmalka kaliya ayaa lagu heli karaa).
- Xarunta guud ee Federaalka ee macluumaad bixinta Caafimaadka Bundeszentrale für gesundheitliche Aufklärung eegna http://www.bzga.de eegna http://www.infodienst.bzga.de/?id=Seite3233 http://www.infektionsschutz.de/erregersteckbriefe/ (Waxaa lagu heli karaa Luqaddaha Jarmalka, English, Af Carabiga, Af turkiga, Afka faransiiska iyo afka Ruush)
- Xarunta Koontaroolka xanuunada iyo ka hortagga Centers for Disease Control and Prevention (CDC) eegna http://www.cdc.gov/vaccines/vpd-vac/hepb/default.htm (Luqadaha English iyo Isbaanishka kaliya ayaa lagu heli karaa).
- Ururka Caafimaadka Adduunka World Health Organization (WHO) eegna http://www.euro.who.int/en/health-topics/communicable-diseases/hepatitis (Luqadda English kaliya ayaa lagu heli karaa).